

**SHARCI - Lamb. 19 ee 8 Abriil 1970**

**WAX KA BEDDELID XEERKA HABKA CIQAABTA MILITARIGA WAQTIGA NABADDA**

**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

KADIB markii la arkay AXDIGA KOWAAD ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969kii;  
KADIB makii la arkay sharciga lamb 1 ee 21 Okboobar 1969;  
KADIB markii laga baaran degey baahida loo qabo in wax laga beddelo shuruc ka mid ah; Xeerka Habka Ciqaabta Militariga ee Waqtiga Nabadda lamb. 1 ee 31 Maarso 1964;  
IYADOO la fulinayo awooda Golaha ee sharci dejinta;

**WUXUU XEERAYNAYAA:**

***Dhaqangelinta amarrada Xeerka Habka Ciqaabta***

**Qod. 1**

Qoraalka ku qoran faqradda ‘d’ ee Xeerka Habka Ciqaabta Militariga Waqtiga Nabadda waxaa loo bedelay sida soo socota:

‘Garsooraha qaabilsan, Guddomiyaha Maxkamadda Militariga ama Garsooraha Qoraaga ah’.

***Falaalka***

**Qod. 2**

**Rasmiyeenta fal dembiyeedla**

1. Falal dembiyeedka hoos taga xeendaabka maxkamadaha militariga, waxay yihiin fal ciqaabeed caam ah haddii aysan codsi kaas ka bedelan ayasn jirin. waxay dacwadu ku furmi doonta mid ah qaab xafiis kadib markii la helo warbixin ama refeerto , ama barwo ama hab kale oo dacwadu ku furmi karto

2. Haddii fal dembiyeedka ciqaabta noqdo mid loogu tala galay xarig militari oo aan ka badneyneyn ilaa 2 sano, maxkamdeyntaasi waxaa furi karo codsi ka yimaada Taliyaha Qeybta ama sarkaal kale oo loo wakiishay.

Haddii eedeysanahu uusan ahayn militari, codsiga furidda ee Taliyaha looma bahna. Haddii laakin ay si wadar ah fal dembigu ay uga qeyb qaateen militari iyo dad aan ahayn militari codsigaasi wuxuu ka imaan kara shaqsiga militariga oo falka si wadajir loogu soo eedayey.

***Habka hor dhaca dooda iyo xukminta***

**Qod. 3**

**Shaqsigyaaadka iska leh howlaha Booliska Maxkamadda Militariga**

Waxaa lagu kordhiyey xarafka ‘c’ faqradda 1 ee qod. 19 ee Xeerka Habka Ciqaabka Militariga ee Waqtiga Nabadda hadalladaan;

‘Militari kasto oo Taliyihiisa ama Xeer-Ilaalintu u xil saartay’.

#### **Qod. 4**

#### **Xarriga goobaha gaarka loo leeyahay ama goobaha aan hoos tegin xeendaabka Militariga**

Halkaan inta ku qoran waxay beddeli doonta qod. 28 ee Xeerka Habka Ciqaabta Militariga ee waqtiga Nabadda:

‘Markii laga reebo marxaladaha bayaanka ah oo lagu qabtay qof dembiga gacanta kula jiro iyo kadib markii amar Garsoorka militariga soo saaro waxaa lagu dhaqaaqi kara xarig toos ah ee shaqsiyaadka hoos taga xeendaabka militariga iyagoo jooga goobaha sida gaarka loo leeyahay ama kuwa aan hoos tegin Militariga sida ku cad qod. 19.

#### **Qod. 5**

#### **Rafcaan la’aanta amarrada Maxkamadda Sare ee Militariga**

Madaxa 2aad iyo qoraalka qod. 44 ee Xeerka Habka Ciqaabta Militariga waxaa loo beddeley sida soo socota:

‘Goa’aannada Maxkamada Sare ee Militariga lagama qaadan karo rafcaan. Golaha Sare ee Kacaanku wuxuu haddii uu u arko in ay baahidaasi jirto uu baa’bin kara xukunta Maxkamadda Sare ee Militariga’.

Muqdisho, 8 Abriil 1970.

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka  
**Sareeye Guuto Moxamed Siyaad Barre**